

Cudurka Fayraska Jamestown Canyon

Waa maxay cudurka fayraska Jamestown Canyon?

Cudurka fayraska Jamestown Canyon waa cudur dadka loogu gudbiyo qaniinyada kaneecada caabuqu hayo. Fayrasku waa bunyavirus gudaha serogroup-ka California wuxuuna si dhaw ula xiriiiraa fayraska La Crosse encephalitis. Fayruska waxaa markii ugu horraysay lagu ogaaday 1961 kaneecada ka timid Jamestown Canyon, Colorado.

Sidee ayuu halis u yahay cudur fayraska Jamestown Canyon?

Baaxadda jirrada wali waa la sharxayaa cudurkan dhifta ah ee cusub. Astaamaha waxaa kujiri kara jiro hargab la moodo oo si kadis ah qofka ugu soo boodda taasi oo qandho leh. Xaaladaha daran waxaa laga yaabaa inay yeeshaan calaamadaha cudurrada neerfaha sida meningitis-ka (caabuqa maqaarka ku wareegsan maskaxda) ama meningoensephalitis (caabuq maskaxda iyo nudaha ku wareegsan). Ma jiraan daawayn cudurku leeyahay oo aan ahayn daryeel caafimaad. In qofka cusbitaal la dhigo ayaa daruuri noqon karta xaaladaha daran.

Yaa ugu jira halis cudurka fayras ee Jamestown Canyon?

Cudurku wuxuu ku dhici karaa da' kasta. Gobolka Minnesota, xaaladaha cudurada fayraska Jamestown Canyon ayaa si ballaaran loogu qaybiyey gobolka oo idil. Dadka ka shaqeeya dibadda ama ka qaybgalka hawlaha dibadda guriga ama

shaqada ayaa halis wayn ugu jira maadaama ay kaneeco la kulmayaan.

Noocee kaneecada ayaa faafisa cudurka fayraska ee Jamestown Canyon?

Minnesota gudaheeda, waxaan haynaa 50 nooc oo kaneeco ah laakiin dhammaan kaneecada ma cunaan dadka. Noocyo dhawr ah kaneecada ayaa awood u leh inay faafiyaan fayraska Jamestown Canyon, oo ay ku jiraan qaar badan oo dadka qaniinaa. Noocyada Snowmelt *Aedes* ayaa ah kaneecada qaarkood oo faafin kara fayraska haddii ay qabaan. Kaneecadasi waxay so baxdaa xiliga gu'ga waxayna ka so baxdaa barkadaha barafku kudhalaalay, sida badana waxa laga helaa meelaga geedah leh. Maadaama noocyo kala duwan oo kaneeco ah faafin karaan fayraska, cudurka fayraska Jamestown wuxuu iman karaan wakhti kamid ah gu'ga ilaa dayrta.

Maxay dadku samayn karaan si looga hortago cudurka fayraska Jamestown Canyon?

Habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo cudurrada fayraska Jamestown Canyon waa inaad ka ilaaliso naftaada iyo qoyskaaga qaniinyada kaneecada:

- Isticmaal celiyayaasha leh DEET iyada oo la raacayo tilmaamaha calaamadda - ilaa 30% (boqolkiba sodon) DEET waa ammaan waxayna waxtar u leedahay dadka qaangaarka ah iyo carruurta ka wayn da'da laba bilood. Celiyayaasha kale ee wax-ku-oolka ah waxaa ka mid

CUDURKA FAYRASKA JAMESTOWN CANYON

ah picaridin, IR3535, iyo saliidda liindhanaanta eucalyptus. Kaliya isticmaalka alaabada ka diiwaangashanHay'adda Ilaalinta Deegaanka.

- Hore u sii daawee dharka oo ku qalabee alaabta permethrin-kujirto.
- Xiro shaadhahd iyo surwaalo balaq ah oo dhaadheer.
- Ka ilaali kaneecada gurigaaga adigoo ilaalinaya xidhnaanshaha daaqadaha iyo albaabada.

Si aad naftaada iyo qoyskaba uga ilaalisid cudurka fayraska Jamestown Canyon iyo cudurrada kale ee kaneecada Minnesota:

- Biyaha ka faaruqi hareeraha gurigaaga ugu yaraan toddobaadkii halmar si looga hortago kaneecadu inay u isticmaasho weelka meelo ay ku dhasho.
 - Baaldiyada, weelka ubaxa/soosariska, baaquliyada rabbaayadaha, qubaysyada shimbiraha, barkadaha kalluunka, iwm.
- Hubi majaroorada oo si joogto ah uga gur caleemaha si biyuhu si fiican u maraan.
- Giiji daboolada dabacsan si ayna biyuhu ugu ururin.
- Si adag u dabool weelka biyaha lagu kaydiyo (tusaale ahaan, foostada roobka).
- Ka buuxi godadka geedaha ee biyaha qabta wasakh ama ciid.
- Dib u warshadee taayirrada qadiimiga ah ama ku kaydi meesha ayna ka heli karin biyaha roobka.

Minnesota Department of Health
Vectorborne Diseases Unit
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164
651-201-5414
www.health.state.mn.us

Jamestown Canyon Virus Disease – Somali (4/11/19)

Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac 651-201-5414. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyey.